Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka (DCSD),

Waxaan rajeynayaa in qof walba uu yeeshay dhammaad isbuuc badqab oo raaxo leh. Wax badan oo aan u dabaaldagno sida aqoonyahanadeena, macalimiinta, iyo maamulayaasha ayaa sii wado inay hormariyaan inta lagu jiro waqtiyadaan aan horay loo arag. Waan ku faanaa inaan ku dhawaaqno in afarta sanno ee degmada heerka qalinjabinta oo Fasalka 2021 ayaa joohgta sii ahaa inta lagu jiro cudurka safmarka.

Sannad dugsiyeedka 2021 ayaa noqonayo sannadka afaraad ee isku xiggo ee guulaha degmada sannadlaha ee Jasiirada Aasiyaanka/Baasifiga, Ardayda Ingiriiska, iyo koox hoosaadka Ardayda leh Curyaannimada. Guulaha ugu weyn ee laga gaaray dugsiga ayaa ka dhacay Towers iyo Clarkston. Sida waafaqsan xaaladaha caadiga ah, kordhinta heerka qalinjabinta dugsiga ma ahan howl fudud.

Sida waafaqsan cudurka safmarka iyo jawiga waxbarashada fogaanta joogtada ah, waxaan ku bogaadineynaa ardaydeena, qoysaska, macalimiinta iyo maamulayaasha dugsiga dadaalkooda. Guulaha aadka u weyn ee heerarka qalin jabinta ee Dugsiga Sare Towers iyo Dugsiga Sare Clarkston ayaa ah guul la taaban karo oo wajiga dhibaatooyinka. Waan ammaanayaa oo aan u dabaaldagayaa labada dugsiyo, sidoo kale sida dhammaan dugsiyadeena sare, iyo bulshooyinkooda!

**Dugsiyada Title I Guuleystay**

Waxaan sidoo kale rabaa inaan aqoonsado todoba ka mid ah dugsiyadeena ee lagu magacaabay FY21 Dugsiyada Title I Guuleystay. Dugsiga Hoose Chesnut, Dugsiga Hoose Fernbank, Dugsiga Hoose Livsey, Dugsiga Hoose Smoke Rise, Dugsiga Hoose Wadsworth Magnet, Dugsiga Hoose Wynbrooke, iyo Machadka Kulliyada Hore DeKalb ayaa matalo boqolkiiba shanta ugu sareyso ee dugsiyada Georgia sida ku saleysan Tusmada Waxqabadka Kulliyada U diyaarsanaanta Shaqada 2019 (CCRPI) ayaa lagu buundeeyay Waaxda Waxbarashada Georgia.

Waan ku faanaa aqoonyahanada, macalimiinta, iyo maamulayaasha dugsiyadaan, oo waxaan ku dhiirogelinayaa dhammaan dugsiyadeena inay sii wadaan inay horay iyo kor usii dhaqaaqaan!

**Qiimeynada Wararka U.S.**

Waxaan sidoo kale rabaa inaan u hambalyeeyo dhoor ka mid ah dugsiyadeena oo dhawaan ay ku darajeeyeen sida inay yihiin dugsiyada ugu wanaagsan Wararka U.S gobolka. Dugsiga Kittredge Magnet iyo Dugsiga Wadsworth Magnet oo Gaarayaasha Sare ayaa lagu darajeeyay kowaad iyo labaad, si kala gooni ah, sida inay yihiin dugsiyada hoose ee ugu wanaagsan gobolka, iyada oo Dugsiga Hoose Austin lagu darajeeyay kan sagaalaad. Dugsiga DeKalb ee Farshaxanka ayaa sidoo kale sameeyay 10-ka ugu sareeyo 10 sida lixda ugu wanaagsan ee Georgia ee qeybta dugsiga dhexe/sare. Machadka Kulliyada Hore ee DeKalb, Dugsiga Sare Chamblee iyo Dugsiga Sare Arabia Mountain ayaa lagu darajeeyay 31aad, 39aad, iyo 63aad, si kala gooni ah, oo qiimeynada dugsiga sare ee gobolka. Waxaan ahay kormeere guud oo ku faano!

**Hoolka Maamulka ee Qorshaha Mastarka Dhameystiran**

DCSD ayaa martigelineyso labadooda kulamo ugu dambeeyo ee hoolka maamulka magaalada goboleedka Qorshaha Mastarka Dhameystiran (CMP) taariiqda Okt. 26 iyo 27, laga bilaabo 6 p.m. illaa 7:30 p.m. nidaamka qorsheynta mastarka DCSD waxaa ku jiro qiimeynta dugsiyada oo dhan iyo xarumaha maamulka, sidoo kale sida kaabayaalka lagu taageerayo howlgalka waxbarashada degmada.. Nidaamkaan waxaa ku jiro xog aruurinta ku saabsan xarumaha dugsiga ee loo isticmaalayo in lagu hormariyo mudnaanada liiska mashruuca xiggo ee Canshuurta Iibinada Iqtiyaariga ee Ujeedada Waxbarashada Gaarka ah ee Deegaanka (E-SPLOST Educational Special Purpose Local Option Sales Tax). Wixii warbixin dheeraad ah iyo dib u eegida jadwalka, fadlan riix halkaan.

Hoolkaan maamulka waxay ahaaneysaa kaliya hal fursad oo lagu bixiyo talo iyo jawaab celinta. Waxaan ku rajo weynahay in nidaamka CMP ay naga caawineyso sii wadista dhisida aaminaad iyo daah furnaanta ee kooxda daneeyayaasha balaaran. Waxaan ku jirnaa nidaamka dib u heshiisiinta dhammaan E-SPLOST mashaariicda IV iyo V oo ku faraxsan wadaagista kormeerkeena cusub iyo ku soo wargelinta aaladaha bulshooyinkeena. Kulanka xiggo ee Guddiga La talinta E-SLOST ayaa la qabanayaa Arbacada, Okt. 27, saacada 7 p.m. Waan sii wadeynaa inaan horay iyo kor u dhaqaaqno sida degmo ahaan!

**Aqoonsiga guusha Ardayga**

Isbuucaan, waxaan idinla wadaagayaa ardayga shannaad ee Dugsiga Guddiga Caalamiga ah Mali Ali. Mali ayaa loo xushay sida Muwaadinta Caalamka oo bisha Sebteembar. Agaasimaha dugsigiisa ayaa yiri Mali wuxuu matalay maskax furan. Ha ahaado ahaanshaha qofka ugu horeeyay ee la hadlo arday cusub, isaga oo badelayo qaabkiisa u fakaro, ama wanaag ka dhahida dadaaladeena mustaqbalka fasalkeena, Mali marnaba dib ugama laaban fursada ku muujiyo wanaagiisa. Kuma shaqeeyo cabsi oo wuxuu muujiyaa. Waan ku faanaa inaan idinla wadaago ardaygaan cajiibka ah!

**Horyaalka Dugsiyada Hal abuurka**

Waxay ii aheyd sharaf inaan ka qeybgalo Deyrta 2021 Shirarka Isku dhafka ee Horyaalka Dugsiyada Hal abuurka isbuuca la soo dhaafay ee Washington D.C. si aan ugu dabaaldago 10-sanno guuradii Digital Promise. DCSD ayaa dhawaan la aqbalay Horyaalka Dugsiyada Hal abuurka, isbaheysiga qaranka ee horay u fikirka dugsiyada degmada K-12 ee ay diyaariyeen Digital Promise, hay'ad aan faa'ido doon aheyn ee leh howlgalka lagu dadajinayo hal abuurka waxbarashada iyo hormarinta fursada loogu baranayo dhammaan dhinaca cilmiga farsamada iyo cilmi baarista. Waxay aheyd raaxo loogu xirayo hogaamada waxbarashada ee kale oo wadanka oo dhan ah iyo Ninka koongareeska Hank Johnson. Ninka koongareeska Johnson ayaa ah horyaal dhab ah ee DCSD oo waan ka mahadcelineynaa taageeradiisa iyo dhammaan waxa uu u sameeyo degmada ee Dhismaha dowlada U.S.

**Aqoonsiga Sahanka Bulshada**

DCSD ayaa hadeer marayo nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga. Qeyb ka mid ah nidaamkaan waa aruurinta jawaab celinta ka imaaneyso daneeyayaasha. Waxaan kugu casuumeynaa inaad ka qeybqaadatid Sahanka Daneeyayaasha Qoyska iyo Bulshada. Natiijooyinka sahankaan, oo ay la jiraan waxyaabaha kale ee daneeyayaasha, ayaa lagu isticmaalayaa nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga.

Sahanka Daneeyayaasha Bulshada iyo Qoyska ayaa lagu heli karaa luuqadaha xiggo: Amxaaro, Carabi, Bengaali, Burmeesa, Shiineeska, Ingiriiska, Faransiiska, Hindida, Nebaali, Soomaali, Isbaanish, Sawaaxiili, Telugu, Tigriinya, iyo Fiitnaamees. Sahanka waa qarsoodi oo wuxuu qaadanayaa qiyaastii 10 daqiiqo lagu dhameystirayo. Waxaad ka geli kartaa sahanka ciwaanka xiggo:
https://survey.sogosurvey.com/r/eY7O00

**Baaritaanka iyo Tallaalada Kormeerida COVID-19**

Waaxda Adeegyada Caafimaadka Ardayga oo kaashanayo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Georgia ayaa ku faraxsan inay keenaan Baaritaanka Kormeerida degmadeena! Baaritaanka kormeerida waa qaab badqab, wax ku ool leh oo lagu xadeynayo faafida COVID -19 iyo sii wadida ku haynta dugsiyada kuwa u furan waxbarashada qof ahaanta. Baaritaanka COVID-19 ma ahan qasab oo waxaa loo bixiyay inay illaaliso ardayda, shaqaalaha, xubnaha qoyska, iyo bulshadeena. Barnaamijka Baaritaanka Bilaashka ah ayaa loo heli karaa qof walba, xittaa haddii si buuxdo laguu tallaalay. Si loo cabiro xiisagha barnaamijka baaritaanka isbuuclaha, caawintaada ayaa loo baahanyahay. Fadlan riix halkaan si aad u dhamesytirtid Sahanka Kormeerida COVID-19 si aad u tilmaantid xiisahaaga looga qeybqaadanayo barnaamijka. Si loogu qorsheeyo si wax ku ool ah, sahanka aa in la dhameystiraa xiliga Oktoobar 27.

DCSD ayaa sidoo kale martigelineyso rugta caafimaadka baaritaanka iyo tallaalka COVID-19 ee loogu tallogalay shaqaalaha, ardayda iyo bulshada. Tallaalo iyo baaritaan bilaash ah ayaa loo helayaa dhammaan da’ walba. Dhacdada xigta ee balansan waa Jimcaha, Okt. 29, laga bilaabo 8:30 a.m. illaa 1 p.m. ee Dhismaha Maamulka iyo Waxbarashada, 1701 Mountain Industrial Blvd, Stone Mountain, GA. Baaritaanka COVID-19 ayaa sidoo kale laga helayaa Xarunta Gaadiidka Doraville, DCSD’s Waaxda Gaadiidka, iyo Xarunta Gaadiidka Panthersville. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo www.freecovidtesting.us/dekalb.

Fadlan sii joogtey inaad ka booqatid websaydkeena iyo websaydka dugsigeena oo warbixinta ugu dambeyso ee aqbaaraha degmada. Isbuuc wanaagsan!

Daacadnimo,

Marwo Cheryl Watson-Harris